مركز الكتاب للبحوث والدراسات | بوصاصو–الصومال

فبراير 2019

GANACSIGA & GURIGA:
HAWEENKU MA KULMIN KARAAN?

XAAWO CALI MAXAMED

TUSMO

LM	Cinwaanka	Bogga
1	Ururin	3
2	Hordhac	4
3	Sooyaal taariikheed	5
4	Masuuliyadaha haweenka	6
5	Ganacsiga haweenka	11
6	Baahi intee le’eg loo qabaa ganacsiga haweenka?	15
7	Mala kulmin karaa ganacsiga iyo guriga?	17
8	Gunaanad	21
9	- Natiijooyin	21
10	- Talooyin	22
11	Tixraacyo	23

URURIN

Qormadaan waxay ka hadlaysaa “guriga iyo ganacsiga: dumarku ma kulmin karaan?”, si loo helo xog muujin karta dumarka ganacsatada ah, qaybahooda, noocyada ganacsiyadooda, xiliyada ay shaqeeyaan, iyo saameynta ay ku yeelan karto guriga, waxaa loo adeegsaday qormadaan manhajka daraasadda xaaladda (منهج دراسة الحالة).

Ugu horreyn qoraagu waxay ka hadashay qeexidda ganacsiga, xiligii uu bilowday ganacsiga dumarka, sababaha keenay, iyo waxa ay kusoo kordhisay bulshada dhib iyo dheef, kadib waxaan ka hadalnay wax tarka uu u leeyahay ganacsiga haweenku bulshada, iyadoo aan u kala qaadnay qeybo kala duwan, sida in reer lagu biilo, baahida loo qabo intay le’eg tahay, iyo in ay jiraan goobo looga baahan yahay dumarka, iwm, sidoo kale waxaan ka hadalnay dhibaatada uu keenay ganacsiga haweenku, sida dayaca ilmaha, dayaca guriga, culaysinta nafta, iwm.

intaa kaddib waxay ka hadashay masuuliyadda dumarka oo ay sii qaybisay, mid kastana gaarkeeda uga hadashay iyo kaalinta ay ku leeyihiin ka qayb qaadashada hormarka bulshada, waxay ka hadashay sidoo kale ganacsiga dumarka, meelaha ugu badan oo ay ka ganacsadaan iyo fursadaha u banaan, kadibna baahi intee le’eg loo qabaa ganacsiga haweenka? Mase la kulmin karaa ganacsiga iyo guriga? iyo waxa ay ka dheheen dadkii lawaraystay.

Ugu dambeyn waxaa kasoo baxday qormadaan in ay dumarka shaqeeya ay qabaan inta badan oo iskugu jira kuwo xog ururin afka ah iyo mid warqado ku qorana in ay adagtahay in la kulmiyo ganacsiga iyo guriga, iyadoo abuuraysa dayac ilmaha iyo qoyskaba saameeya.

HORDHAC

Alaah ayaa mahad oo dhan u sugnaatay, naxariis iyo nabad galyana nabigeena korkiisa ha ahaato.

Intaas kaddib waxaan qormadaan uga hadlaynaa dumarka soomaaliyeed ganacsiga iyo guriga ma isku keeni karaan, waxaan kale oo ka hadlaynaa kaalinta ay ku leeyihiin ganacsiga iyo baahida loo qabo intay le’eg tahay ayagoo sifiican u faah faahsan ayaad ka heli doontaan qormadaan dhexdeeda, waxaad kale oo aad ka helaysaan qormadaan dayac intee le’eg ayaa soo gaaraya ilmaha iyo gurigaba markay hooyadu shaqo aaddo.

waxaana ka mid ah meelaha ay dumarku aadka uga ganacsadaan, dharka qaybihiisa kala duwan, sida dharka ilmaha, baatiga, huudhayda, dahabka, caagadaha, weelasha, kabaro, khudaarta, caanaha, kaluunka, hilibka, adeegyada yar yar sida raashinka xirxirka ah, subagyada oodkaca, iyo xawaashyada, iyo waxyaabaha xirxirka oo dhan.

Waxaan qormadaan halbeeg ka dhiganay xog ururin aan ku sameynay ganacsatada haweenka ah, inagoo goobaha ganacsiga ku soo booqanay, kana waraysanay su’aalo ku saabsan ganacsiga iyo sababihii ku kalifay sida: maxaa ku kalifay ganacsiga? sidee isugu maareeyaan ganacsiga iyo guriga? muxuu faaiido u leeyahay bulshada? muxuuse dhib u keeni karaa bulshada, iwm.

Waxaa kale oo aan ku dhisaynaa cilmi baaristaan wixii aan soo aragnay iyo waxaan qiyaasnay.

Inkastoo caqabado aan kala kulannay xog ururintii aan ku samaynay dumarka, oo la xiriira dhanka wada shaqaynta haweenka ganacsatada ah, sidaas darteedna xog badan nooma suurtagalin inaan ka helno.

SOOYAAL TAARIKHEED:

Qeexid: ganacsigu waa koox macluumaad ganacsi ah taas oo kulansanaysa gadasho iyo soo gadasho gaar ah adeegyo iyo badeecooyin, waxaa lagu qeexaa ganacsiga in ay tahay kala badalasho koox alaab ah lagu kala badalanayo heshiis ganacsi ah, waxaana loola jeedaa gadasho iyo soo gadasho gaar ah adeegyo, ama agab gaar ah.

Waxaa kaloo lagu qeexaa ganacsiga in uu yahay camaliyadda isku xiraysa gadashada iyo soo gadashada allaabta gaarka ah haba ahaatee qaab duuduuban ama qaab kala dhigdhigan.

Haweenku waagii hore waxay ahaayeen guryo joog oo ah kuwa guryahooda jooga oo aan u soo bixin suuq ilaa in ay ka adeeganayaan mooyee taasna waxay u ahayd sharaf iyo dhawrsanaan oo ma ahan wax maagitaan ah, raguna waxay ka soo bixi jireen masuuliyada alle saaray oo ah biilka qoyska.

Markii ay dawladii soomaaliya burburtay oo ay bilowdeen dagaalladii sokeeye ayaa waxaa bilowday xilli kaduwan xilliyadii hore iyo dhaqan ka duwan dhaqankii soomaalidii hore oo ah in ay ragii ka soo bixi waayaan masuuliyaddii saarnayd waxaana keenay meel waxay kaga jiraan dagaal oo waqti ay shaqeeyaan maba hayaan ama waala dilin hadii la arko isagoo meel jooga iyo wadankii oo ku jira burbur iyo kala qax, taasna waxay keentay in ay baahdaan dumarkii iyo ciyaalkii.

Markii xaalku sidaa noqday ayey dumarkii bilaabeen in ay isku dayaan buuxinta booska banaan oo waxay bilaabeen mid kasta wixii ay awooddo in ay ka shaqayso ama ka Ganacsato, dabcan ma ahan dhaqan fiican in ay haweenku suuqa galaan laakin waxaan dhihi karnaa danta ayaa keentay oo ma jirin hooyo jecel in ay labo shaqo isku waddo.

Wixii ka horeeyey burburkii hooyo dan ku kaliftay uun baa shaqayn jirtay sida kuwa agoomaha haysta wax ku biilana aan haysan, ama kuwo lagu furay meel kaloo ay wax uga keentana aan garanayn.

Wixii ka danbeeyey burburkii dawladii soomaaliya sidii ay u bilaabeen dumarku shaqada ayey u wadaan bal marba marka kadanbaysa way sii badanayaan dumarka shaqeeya iyo kuwa ganacsada,waxaana keenaya labo sababood: markii dagaaladii dhamaadeen ragii masuuliyadoodii kuma soo noqon in toodii badnay oo waxaabad moodaa saas ayey dan moodeen oo waxay iska bilaabeen qaad iyo masuuldaro oo ah in aysan iskaba saarin reerkii masuuliyad, iyo shaqadii haweenka oo lala qabsaday oo ay noqotay hooyadii aabe iyo hooyo.

MASUULIYADAHA HAWEENKA:

Allah markuu abuuray aadamaha wuxuu ka dhigay rag iyo dumar mid kastana masuuliyad ayuu saaray.

Maamulka guriga:

Maamulka guriga waxay kamid tahay masuuliyadaha dumarka waayo waa shaqo ay ayaga oo kaliya ka soo bixi karaan, waligeedna ay soo qaban jireen hadii aan dib u eegno haweenkii hore shaqadooda ugu badan waxay ahayd maamulka iyo hawlaha guriga iyo wax soo saar hal abuur ku jiro, waxaana kamid ah shaqooyinka guriga korinta ilmaha, daryeelka sayga, nadaafada qoyska, cuntada, iwm.

Hadda kaalintii dumarka waxyaabo badan ayaa ugu soo darmaday maamulkii guriga sida shaqada, ganacsiga, sidaas oo ay tahay dadaal ayey ku bixiyaan sidii ay uga soo bixi lahaayeen maamulka iyo

hawlaha guriga gaar ahaana dumarka soomaalidu aad ayey ugu dadaalaan in ay san gabin xilka saaran.

Daryeelka qoyska:

Waxaan dhihi karnaa daryeelka qoysku waa arin muhiima ah hadii ay meesha kabaxdana waxaa imaanaysa in uu hoos u dhac ku yimaado qoskaas, dumarku waxay daryeelaan dhamaan qoyska qaybihiisa kala duwan gaar ahaana caruurta, iyo nimanka, markii ay shaqabilaabaana waxaa hoos u dhac ku imaanayaa daryeelkaas, waxaana keenaya in ay maqan tahay marar badan ama ay daalan tahay oo aysan awoodin in ay waxbadan qabato.

Korinta iyo tarbiyada ilmaha:

Qormadaan waxaan wax ka sheegaynaa masuuliyada haweenka ee dhanka caruurta waxaa ka mida masuuliyadahooda korinta, iyo tarbiyada ilmaha, hadii ay hooyadii shaqo banaanka ah u baxdo ilmihii waxay ku yeelanaysaa saamayn, maxaa yeelay waqtina way ka maqantahay markay imaatana way daalantahay intaas oo ay u sii dheertahay shaqadii guriga iyo masuuliyadihii kale ee saarnaa, maamo dukaan xafadeed ku haysan jirtay magaalada Boosaaso waxay noo sheegtay in ay ilmuhu ku dayacmaan shaqada hooyoda oo aysan kaba warqabi karin waxbarashadooda, waxsiintooda, iyo tarbiyadooda, dukaankii guriga ku yaalay haduu saa u mashquulinayo shaqada banaankana daran hoyada suuqa u kalahaysa galabkii ama cishaha imaanaysa wat badan bay ka maqantahay kamana waxqabi karto waxbarashadiisa iyo tarbiyadiisii, mase kawar qabi

kartaa casharadiisii, in uu soo qaatay iyo in kale.

Waxay raad ku yeelanaysaa ilmaha hooyadiis shaqayso dhinacyo badan waxaana kamid ah waxbarashada, iyo hadalka, sida ay cadaynayso daraasad cilmi baaris ah oo dhawaan la sameeyey dumarka shaqeeya ilmahoodu waxay dareemayaan markastsa hoosayn waxbarasho marka loo fiiriyo caruurta aan hooyooyinkood shaqayn, waxay sheegtay cilmi baaris lagu sameeyey 4 kun oo kamid ah caruurta maraykanka, dhibaatada ugu badan oo haysata in ay tahay hoosayn, iyo soo koobid la'aan ka haysta mahaaraatka akhriska, ku hadalka, iyo ciyaarta, waxaana dhici karta in ay la socoto noloshooda oo dhan, waxaaba Dhici karta in ay raad ugu tagto noloshooda dhaqaalaha iyo shaqadaba [1].

Waxaa dhacda ayana in ay qayb kamida hoyoyinka shaqeeya ay geeyaan ilmaha yaryar xanaanooyinka taas oo ka dhigan in ilmihii uu in badan la joogo meel ka fog hoyadii sida aan ka soo xiganay cilmi baaristaan lagu sameeyey dumarka shaqeeya.

Waxay sugeen cilmi baarisyada cilmi nafsiga ee dhawaan la sameeyay ahmiyada ay leedahay tarbiyada guriga mustaqbalka qofka kaliya sanadaha ugu horeeya, isbedaka ku dhacaya xaafadahana uu yahay waxa ugu horeeya diyaarinta iyo tarbiyada ilmaha yar luuqad maganayo, waana in uu barto.

Waxay sheegaysaa cilmi baaristaan in ay ilmaha hooyadoo shaqayso ay ka bartaan maqnaashaheeda in ay naftooda ictimaadaan oo

[1] عمل المرأة وأثره على العلاقة الزوجية، تأليف: عبدالرؤوف بلعقاد

aysan cid ku tiirsanaan iyo in ay sheegtay in cilmi baaris la sameeyey lagu ogaaday in aysan farqi wayn u dhexayn ilmaha hoyadii shaqayso iyo kuwa aysan shaqaynba lakin ay ku xirantahay say hoyadu u la dhaqanto ilmaheeda[1].

Waa xogtii aan uruurinay dayac ugu imaanaya ilmaha shaqada hooyada %33.3 waxay dheheen dayac waa uga imaanayaa, kuwa aan waraysanayna sidoo kale bay noo sheegeen waxayna ku dareen in uu ilmaha yaryar oo aan gaarin in uu wax qabsado dayac aad u badan ka soo gaarayo shaqada hooyadiis.

Daryeelka raga:

waxaa allah haweenka masuul uga dhigay raga dumarka dumarkana waxaa masuul looga dhigay guriga saygeeda waxaan soo hoos galay guri xaqa ninku uu ku lee yahay xaaskiisa, axaadiis badana waxay ina tusinaysaa xaqa uu ku leeyahay ninku xaaskiisa iyo in markasta dumarku ay adeecaan nimankooda wixii aan macsi ahayn ilaa uu gaarsan yahay in uu nabigu naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee, uu yiri:(hadii cid bini aadamka ka mida la amri lahaa in ay isku sujuudaan waxaan amri lahaa xaasasku in ay u sujuudaan niman kooda), taasna waxay ina tusinaysaa sida ay u xeel aheertahay in la is adeeco.

Cilmi baarisyada lagu sameeyo arimaha qoyska waxay sheegayaan in aysaaman ku yeelanayso shaqda dumarku qaybaha qoska oo dhan gaar ahaana ilmaha, iyo ninka, waxaana wax ka soo qaadan doonaa qayb ka mida cilmi baarisyadaas.

---

[1] المرأة العاملة والعلاقات الأسرية، نشر بتاريخ ٩-١٠ أبريل ٢٠١٣م

Xog ururintii aan samaynay waxaa ka mid ahaa waxyaabihii aan xog ururinta ku samaynay dayac uga imaan kara ilmaha iyo guriga shaqada gabadha iyo cuyska nafteeda ay saaran markaab way diinay saan ayey noogu jawaabeen, %33.3 waxay dheheen dayac waa uga imaanayaa ilmaha hooyada shaqadeeda, 37.5 waxay dheheen waxaa dayac uga imaanayaa guriga, meesha ay dheheen 45.83 culaysinta nafta oo culays badan ayaa ku imaanaya hoyadii shaqaynaysay gurigiina ka shaqaynaysay.

Horumarinta bulshada:

Dumarku horumarinta bulshada kaalin muhiima ayey ka qaadan karaan kana qaataan kana qaadan jireen hadii aan dib ugu laabano haweenkii soomaaliyeed iyo say uga qayb qaadan jireen horumarinta bulshada waxaan oran karnaa waxay ahaayeentiir dhexaadka bulshada, waxay ahaayeen kuwa ka muuqda qaybaha kala duwan ee bulshada in kastoo aan loo ogolay in ay yimaadaan meelaha ragu ku shirayo lakin waxaa carabtu ku maahmaahaa,(ninkasta oo qiimo leh haween baa ka danbaysa) soomaaliduna waxay ku maahmaahaan(rag wuxuu isku dhaafaa ciidan dumar iyo caano idaad) iyo (nin naag fiicani u dhaxdaa ma nafci yara).

Haweenku waa dad wax soo saarleh oo waxay ka qayb qaadan jireen wax kasta oo bulshada lagu hormarinayo mar kastana wax ahaayeen garabka raga.

Dumarka hada jooga ayana kama nafci yara haweenkii hore ee soomaalida badan koodu waxaysan lahayn uun wax qabadkii dumarkii hore in kastoo ay soo badanayaan

dumar xirfado leh ugana faaiidaynaya kuwa kale waan loo baahan yahay in ay noqoto bulshadu mid wax soosaar leh, lakin waxay ku badasheen wax aysan lahayn dumarkii hore oo ah in ay shageeyaan.

Dagaalaadii sokeeye iyo burburkii wadanka cida ugu badan ee ka soo saartay bulshada soomaaliyeed waa haweenka oo mid kasta meesha ay wax ka qaban karto ayey ka bilowday taas oo keentay in aan arkayno dumarka badankoodu in ay shaqaynayaan, ayagoo ku dadaalaya ka qayb qaadashada hormarinta bulshada, iyo in uu wadanku ka boxo dhibkii soo martay sanadihii la soo dhaafay.

GANACSIGA HAWEENKA:

Shaqada dumarka waa ay is ku khilaafeen mufakiriintu midkastan aragti iyo xujo ayuu wataa, qaar waa taageeraan, qaarna way ka hor imaadaan ayagoo leh gabadha shaqadeedu waa korinta iyo tarbiyada ilmaha, iyo in ay guriga maamusho.

Sanadahaan danbe way soo badanaysaa ganacsiga dumarku waana arin u banaan allahna kama xarimin lakin raga ayaa masuul laga dhigay oo wixii u baahan tahay gabadhu laga rabaa, dumarka shaqadooda ugu wayn waa masuuliyada guriga iyo korinta ilmaha, waxay saamayn ku yeelanaysaa qoyskii iyo bulshada markay hoyadii shaqo aado ilmiyii kawarqab iyo la socod buu u baahan yahay iyo in waxbarashadiisa lala socdo markasta, oo markasta lagama marmo qof guriga si joogto ah

masuuliyad ugu saaran tahay, Waxay sheegayaan cilmi baarisyo iyo daraasaat cilmi nafsi ah oo lagu sameeyey dumar shaqeeya in ay isbedelayso nafsiyadoodu oo ay ka fakarayaan wixii dan tooda iyo shaqadooda ah oo aysan ka fakarayn wixii aan ahayn wax guud meesha ay ka fakari jireen nimankooda iy caruurtooda marka shaqa bilowdo waxay ka fakaraysaa shaqdeeda iyo wixii ka hor imaan kara, waxaa la sheegaa in midka mida buugeeda laga helay ayadoo leh (waxaan nacladayaa jirkayga waayo ma aragtaan isga dartiis in aan haysto wax ka qaalisan[1] waa hadal aan carabi kasoo tarjumnay.

Gabdhaha shaqeeya nafsiyan waxay dareemaysaa qalaq badan waxaana keenaya shaqada, waxaana ugu wayn qalaqaas ikti'aab iyo in ay dareemayso danbi oo ah ilmihii iyo gurigii[2].

Noocyada ganacsiga:

Dumarka ganacsada waxa ka ganacsadaan noocyo badan oo kamida ganacsiga kuwaas oo noqonaya qofkasta iyo awoodiisa waxaa kamida ganacsiyadaas kuwa ay dumar kaliya ka ganacsadaan iyo kuwo ay rag iyo dumarba kaganacsadaan waxaan halkaan uga hadli doonaa qaybaha ganacsiga dumarka iyo kuway ugu badan.

Dumarku waxay ka ganacsadaan qaybobadan oo ka mida waxyaabaha laga ganacsado waxaa ka mida kuwa ay ugu badan yihiin dharka oo isugu jira dhar

---

[1] boga 18 waxaa qoray balcaqaab cabdi rauuf عمل المرءة وأثره على العلاقة الزوجية

[2] عمل الزوجة وانعكاساته على العلات الأسرية, bogga 86, waxaa laniqaashay 2003 2004

caruur, dhar dad waawayn, huudhayda, kuwaas oo ay ku kala gadaan carwooyinka, dukaamada dharka, kuwa dharka huudhayda ah iyo kabarada oo ah meelaha ugu badan ee ay dumarkbu dharka ku gadaan taas oo ay ku ka liftay labo sababood oo kala ah in aysan helayn dhaqaale ay ku kiraystaan iyo in aysan helayn meeshii ay kiraysan lahaayeen, waa sidii ay noo sheegeen dumar ganacsato ah.

Waxaa ka mida ganacsiya gaarka u ah dumarka dahabka oo ay hada ka ganacsadaan dumar kaliya burburka ka horna rag baagadi jiray.

Sidoo kale waxaa dumarka u gaar ah burukiyeerada oo ah meelaha is qurxinta ee dumarka waa majaal ugaar ah dumarka.

Waxaa kaloo ay dumarku ku badan yihiin khudaarta waa meelaha ugu badan ee ay dumarku ka shaqeeyaan, taas waxaa lamida adeegyo badan oo yaryar oo ay dumarku ka ganacsadaan.

Waxaa ka mida ganacsiyada dumarka: subaga ariga iyo lo’da, oodkaca, iyo subagyada, caanaha, hilibka, kaluunka, weelasha, oo ah meelaha ay ugu yaryihiin, dukaamada caagadaha.

Qaybaha dumarka ganacsada:

Dumarka ganacsada waa qaybo badan yihiin waxaa kamida kuwo garoobo ah, kuwo laga dhintay, kuwo xaas ah, kuwaas oo ay ku kaliftay dantu iyo in ay ku biilaan ilmahooda iyo kuwa u furtay shaqa abuur ama dhaqaale raadis.

Waxaana ugu badan kuwa xaaska ah sida aan ku ogaanay cilmi baaris aan ku samaynay ayagoo badan koodu u sameeyey dhaqaale samaysi, qaarna biil raadis waxayna isugu jiraan kuwo nimankoodu aysan shaqayn

iyo kuwo uu xanuunsan yahay iyo kuwo uu waynaaday oo uu san awoodin shaqo.

Da’da dumarka shaqeeya waxa ay u dhexaysaa 25 ilaa 70 wixii 50 ka sareeya ma badna oo waxaan ku qiyaasi karnaa %10 waayo ka ma soo bixi karaan markii laga reebo qof yaraantii ku bilaabay ama bid ilma agoona korinaysa iyo mid garoob ah oo aan meel laga biilo haysan, dumarka u dhexeeya 25 ilaa 30 ayaguna ma badna oo waxaan ku qiyaasi karnaa waxa ka ganacsada %8 waayo waa dad dhalin yaro ah wali oo guryahooda jooga ama dhawaan guursaday, waxaa ugu badan dumarka ganacsada kuwa u dhexeeya 30 ilaa 50 waxaana keenaya inta badan in ay ilmahoodii koreen oo waxbarasho aadaan iyaguna ismaamuli karaan iyo in ay aaminsan yihiin in aytahay korinta ilmaha intuu yaryahay, ama waxaa keeni kara in ay niman koodii shaqo la’aan ku dhacdo ama uu ku filnaa waayo biilka qoyska ama uu waynaado oo uusan awoodin shaqo ama xanuunsan yahay, waxaa kaloo keeni karta in ay kala tageen ilmana joogaan oo uu san biil siin, iyo in laga dhintay cid biishana aysan jirin. Xogtii natiijadii ka soo baxday xaga da’da Dumarka ganacsada iyo da’da ugu badan 25 ilaa 40 dumarka u dheeya waxaa weeye %54.16, dumarka u dhexeeya 40 ilaa 60 waxaa weeye %41.7, da’da ugu badana ee dumarka ganacsadana waa kuwa u dhexeeya 30 ilaa 50 oo noqonaya celcelis ahaan %75

Xogtii aan arurinay natiijadii ka soo baxday dhanka Xaalada dumarka ganacsatada ah ma waxaa weeye gabar, garoob, carmal, xaas, waxaa xaas ah nisbo dhan %62.5, meesha ay carmaltahay %8.3, sidoo

kale waxaa jira ayana kuwii garoobka ahaa oo dhan %25. Waqtiyada ay shaqeeyaan %12.5 waxay shaqeeyaan hal galin meesha ay shaqeeyaan %87.5, aya ga oo u badan xaasas sidaan kor ku soo xusnayba, waana dumar wada ilma lay ah halkaas waxaa ka imaan karta in tarbiyadii ilmaha ay hoos u dhac ku yimaado.

BAAHI IN TEE LE' EG LOO QABAA GANACSIGA HAWEENKA?

Baahi waa loo qabaa in ay shaqeeyaan dumarku lakin ma gaar siisana in ay dumarkii suuqa u wada kacaan waxay isagu jirtaa baahidaas mid guriga lagu samayn karo iyo mid u baahan in loo aado banaanka.

Gabadhaan waxay leedahay anigoo eegaya khibradaydii oo ah in aan ahaa bilowgii noloshayda mid shaqaysa waxaan leeyahay: hadii ay awoodaan haweenku in ay is waa fajiyaan shaqadooda asaasiga oo ah hooyo nimo iyo xaasnimo cid ku diidaysa maleh[1].

lakin meesha la isku haysto waa seebay isku waafajinaysaa.

Sabaabaha ku kalifay:

Waxaa ku kalifi kara asbaabo badan waxaan ka mida in ay tahay carmal aan haysan cid wax siisa, ama ay ka

[1] faadimo khaliil maxamed muxsin دور المرءة المسلمة بين الأصالة والمعاصرة

dhalatay reer faqaro ah oo ay u shaqaynayso si ay waalidkee u la bixiso masuuliyaadka guriga, ama uu san ninkeedu shaqay si kasta ha ahaato sababta uu la shaqayn waayey, ama in ay san ku filnayn lacagta uu ku shaqeeyo ninkeedu oo ay u shaqaynayso say u kabto reerka.

Waxaa dhici karta in ay u shaqeeyaan gabdhaha yaryar si ay xaajaat kooda u daboolaan ama waa mabda'a ay aaminsatahay ama waxay u shaqaynaysaa in taas oo dhan ayaa waxbarasho la iga soo bixinayaye ma guribaan iska fariisan. Cilmibaaristaan ku samaynay dumarka boosaasana waxaa nooga soo baxay in ay taha asbaabta ku kalifta sidatan: Sababaha ku kalifay waxay noqotay sidaan: %62.5 waxay dheheen biil raadis, meesha ay dheheen %20.83 dhaqaale samaysi, kuwa ugu dan beeyana waxay dheheen shaqo abuur aya goo dhan %20.83.

Ganacsiga dumarka u gaarka ah:

waxaa ka mida ganacsiya dumarka u gaarka ah koofeerada oo ah meel u banaan dumarka oo kaliya cida loo adeegayana ay tahay dumar kale ayagoo guryahooda ka furan kara shaqaalana keensan kara ama guri ku dhagan guri gooda ku dhagan oo ay uga war qabi karto ilmaha iyo guriga, cilaan saarida waa majaal ubanaan ama u gaar ah dumarka saydoonaana uga faaiidaysan karaan, waxaa kaloo kamida majaalada gaarka u ah haweenka in ay tahay dhakhtarad ku takhasustay arimaha dumarka waayo waa arin muhiim ah oo dumarka yaa ubaahan, waxay ka loo noqon kartaa dhakhtarada ilmaha, ama way noqonkartaa ummuliso taas oo ah wax baahi u qabto bulshadu ayadoo ku dadaalaysa waxbarasho fiican iyo qalab casri ah iyo nadaafada.

majaalaadka dumarku ay ka ganacsan karaan waa badan yihiin ku waas oo fursad u sii

nayo in ay isku wataan hawlaha guriga iyo shaqadooda.

Waxaa ka mida ayan ganacsigada dumarka u gaarka ah caanaha, subaga, luqmada, ku waas oo ah ganacsiyo yar yar oo ay uga ganacsadaan dumarku si ay uga helaan nolol maalmeedkooda.

Sidoo kale waxaa ka mida ganacsiyada haweenka kaganacsiga caagada sida: fuustooyinka biyaha, jeergaamada, caagadaha, iyo wlm, ganacsigaan oo ah mid aan awal la haan jirin meelo gaar ah oo lagu gado hada dukaamo toban ku dhaw ayaa ku yaal bosaso suuqeeda oo lagu gado caagadaha bas.

Ganacsiyobadan ayaa ugaar ah dumarka mana soo wada sheegi karno lakin intaas waa in taan aragnay ama naloo sheegay.

MALA KULMIN KARAA GANACSIGA IYO GURIGA?

Maya lama kulmin karo guriga iyo ganacsiga hadii uu dhoho qofku anaa isku wadina labadooda mid uun baa dacmin, qofkii dhahaya waala isku wadi karaa waa qof aaminsan in ay tahay ilmaha korintiisu in ay tahay in waxlasiiyo oo kaliya ama in uu waxsiiyo iyo in uu waxbarashada aado qaabkastaba haku aadee ama jidka ha ka soo laabtee lakin qofkii dantu ku kalifto waa in uu isku wadaa ayadoo aan dayaca ilmaha meesha ka maqnayn, waa sida ay nagu dheheen dumar aan waraysanay.

Dadkii aan waraysanay waxay noo sheegeen badankoodu in aysan kulmi kari hadii ay kulanta laga dhaxlayo dhibaatooyin badan oo ay ugu wayntahay dayac ilmaha iyo guriga, qaar baa waxay dheheen xataa ilmaha wax furanaya waxyaabaha ku keenay waxaa ka mida ama ugu wayn shaqada

hooyada iyo daryeel la'aanta.

Dumarkaan waraysanay qaar kamida waxay dheheen hadii uu qofku waqtigiisa nidaamsado wuu isku wadi karaa oo labadiisa hawloodba wuu ka soo bixi karaan.

Kuwa ka soo hor jeedana waxay leeyihiin culays baa uga imaan qofka arintaas iyo dayaca ilmaha iyo guriga iyo, suurtagalna ma ahan in uu isku wado ayadoo aan meel nusqaan ka imaan ama ilmaha ha ahaato ama guriga ama culays la isasaaroba ha noqotee.

Xogtii aan ururiny su'aasha ah mala isku wadi karaa ganacsiga iyo guriga way ku kala qayb sameen oo waxay noqotay natiijadu sidatan %45.83 waxay dheheen haa waala isku wadi karaa, meesha ay dheheen maya la is kuma wadi karo nisbo dhan %12.5, halka ayana ay dheheen nisbo dhan %16.7 xoogaa qofkii dan ku kalifto waa isku wadi karaa si dhib leh. Baahi intee le'eg baa loo qabaa ganacsiga haweenka? Taasna waa lagu kala qayb samay oo waxay noqotay natiijadii sidatan %45.83 waxay ku jawaabeen waxaa loo qabaa baahi %100 ayagoo leh waxa shaqeeyaba waxay u badan yihiin dumar ragiina waxay u bateen wax aan masuuliyad qaadi karin, %25 waxay dheheen waxaa loo qabaa baahi dhan %80, halka ay dheheen %8.3 waxaa loo qabaa baahi dhan %60.

Faaiidada uu leeyahay ganacsiga dumarku %25 waxay dheheen wuxuu leeyahay faaiido dhan %60, meesha ay ku jawaabeen %25 waxu lee yaha faaiido dhan %80, sidoo kale waxay ku jawaabeen %29.7 in uu lee yahay faaiido dhan %100, kuwana %50, kuwa kalena %40, kawa kalana%20, %16.6 way ka aamuseen.

Maxay dhib keeni karaa ganacsiga dumar? %20.7 waxay dheheen wuxuu keeni karaa dhib dhan 20, meesha ay kuwa kale dheheen wuxuu keeni karaa dhib le'eg%40 waana %16.7, meesha ay kuwaana ku qaymeeyeen

%80 waxayn dhan yihiin %16.7, kuwaana waxay ku qiyaaseen %60 ayagoo dhan %8.3.

Fursadaha:

Waxaa u banaan dumarka in ay ka ganacsadaan meelahaan soo socda:

1. In ay guryahooda ka furtaan ganacsi fudud kaas oo u fududaynay labadii danoon oo ay lahaayeen daryeelka guriga iyo ganacsigiiba.
2. In ay sameeyaan wax ayagu gacantooda ku sameeyaan dadka suuqa joogana ii gada dhahdo ama ay usii dhiibato tuulooyinka dad jooga oo ay taqaan.
3. In ay soo iibsadaan allab jumlooyin ah dukaamada xaafadaha ka sii gadaan taas oo ah ganacsi fudud oo aan dhib ka imaanayn.
4. In ay waqtiyada ilmuhu ka maqan yihiin ka soo ganacsadaan wixii ay awoodaan taas oo aan dhib ku ahayn nafteeda ama qoyska.
5. In ay furtaan sida meelaha koofeerada oo kale oo guryahooda ku yaal ama kuwa suuqa ku yaal oo ay u dhiibtaan gabdho dhalin yaro

ah.

Caqabadaha:

Waxaa ka mida caqabaadka hortaagan dumarka ganacsada waxyabaha soo socda:

1. Culysinta nafta, waxaa dumarka ganacsada waxyaabo badan oo ay ka mid tahay fadhiga ay maalinkii oo dhan.
2. Culaysinta fadhiyaan taas oo keeni karta in ay xanuuno ka qaadaan waanaba arkay kuwa shaqadii laga joojiyey oo lugaha ka xanuunsaday taas oo ay ku keentay fadhigii badnaa ee ay fadhin jirtay, in ay meelo fogfog ka yimaadaan, taas oo culays ku keenaysa in ay ku laabtaan gurigii iyo ilmihii oo ku kalifaysa in ay iska joogaan maalinkii oo dhan ma adaama aysan ka bixi karin in ay gurigii tagaan oo soo laabtaan.
3. In ay labo shaqo hayaan, haweenka shaqeeya waxaa isugu darmaday lobo hawlood oo kala ah hawshii guriga oo awalba lagaray aydna hawl culus iyo tii shaqada oo u baahan waqti iyo lasocod oo ay u soo kalahayaan say u badan yihiin markay yimaadaana ayagoo soo daalay ay sugayso shaqadii guri in ay qabtaan iyo ilmihii ay maanta dhan ka maqnaayeen.
4. in ay waqti siiyaan taas oo culays saaida keenasa.
5. Dayaca qoyska, markii ay hooyadii shaqo aado waa kasab n uu san gurigii sidii.

GUNAANAD

Qormadaan oo aan uga hadalaynay ganacsiga iyo guriga dumarku ma isku keeni karaan taas oo aan si faahfaahsan uga hadalnay waxaan ku soo gaab sanaynaa in taas allahna waxaan waydiisanaynaa in uu ku an faco cidkasta oo mowduucaan u baahan kana dhigo mid loola jeeday alle dartiis wixii aan khaladnay nafteena iyo shaydaan ayey ka timid wixii aan saxnayna allah ayaa na solansiiyey.

Natiijooyin:

Waxaa ka soo baxay qormadaan natiijooyinka soo socda:

1. In uu soo bilowday ganacsiga dumarka burburkii dawlada soomaaliya ka dib.
2. In ay tahay sababta keentay shaqada dumarka ragii oo ka soo bixi waayey masuuliyadii saarnayd iyo dagaaladii ka dhacay wadanka.
3. In ay shaqeeyaan haweenka %70 waxaana keenaya dano kala duwan.
4. In dumarka ay isugu darmatay labo shaqo tii guriga iyo tii ganacsiga.
5. In ay u badan yihiin dumarka ganacsada kuwa xaasaska ah.
6. In ay ka dhalatay shaqada dumarka dayaca ilmaha iyo daryeelkiisaiyo tarbiyadiisa.
7. In ay ka qayb qaataan haweenku hormarinta bulshada.
8. In ay jiraan ganacsiya u gaar ah damarka.
9. In baahi loo gabo shaqada dumarka.
10. In ay u badanyihiin dumarka ganacsada 30 ilaa 50 kuwa ay da’doodu u dhexeyso.
11. In ay ka ganavsadaan noocyo kala duwan oo ganacsi ah.
12. In aan la kulmin karin guriga iyo shaqada.

13. In ay ku dadaalayaan sidii loo kulmin lahaa haweenku.

Talooyin:

Waxaan talooyin soo jeedinayaa waxyaabaha soo socda:

1. In ay dumarku cidii aan dani u gaysan ama aan ciyaan korinay mooyee dumarka kale ganacsiga guriga looga baxayo iska daayaan.
2. In ay ku dadaalaan in ay helaan dumarka aan haysan biilkale in ay san ilaawin tarbiyada ilmaha iyo daryeelkiisa iyo in ay waqti siiyaan ilmaha.
3. In ay ku dadaalaan dumarku ganacsiyo fudfud.
4. In ay samaystaan ganacsiyo guryahooda ku yaal ama meel udhaw oo ay ilmaha iyo guriga kawarqabi karaan.
5. In aysan ka maqnaan hooyinka shaqeeya ilmahooda xiliyo fara badan.
6. In ku dadaalaan ganacsiyo ay is waa fajin karaan hawsha guriga.

TIXRAACYO:

1- عمل المرأة وأثره على العلاقة الزوجية، تأليف: عبدالرؤوف بلعقاد

2- المرأة العاملة والعلاقات الأسرية، نشر بتاريخ ٩-١٠ أبريل ٢٠١٣م

3- عمل الزوجة وانعكاساته على العلاقات الأسرية, waxaa laniqaashay 2003 2004

4- faadimo khaliil maxamed muxsin دور المرءة المسلمة بين الأصالة والمعاصرة